Seattle Department of Transportation

PO Box 34996
Seattle, WA 98124-4996

PRSRT STD
US Postage
PAID
Seattle, WA
Permit No. 2871




## Isbedelo Meelaha Baabuurta la dhigto ah ayaa lagu samayn doonaa Magaalada Columbia Dayrta 2017

Labbadii sanno ee lasoo dhaafay, Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxay daraasad ku samaysay meelaha baabuurta la dhigto iyo gelida Magaalada Columbia. Waxaan isticmaalnay warcelintaada ama fikirkaaga si aynu u samayno Qorshe Meelaha baabuurta la dhigto oo Deriska ah

Laga bilaabo dayrta 2017 Waaxda Gaadiidka Seattle waxay isbedelo ku samayn doontaa xeerarka meelaha baabuurta la dhigto si looga dhigo baabuur dhigashada mid ay inbaddan heli karaan dadka goobta degan, dadka booqashada ku yimaada, iyo shaqaalaha. Ka fiiri gudaha faah-faahino ku saabsan isbedelada la qorsheeyay.

**Oggaysiiska Dhagaysiga Dadweynaha:** Waaxda Gaadiidka Seattle waxay qabban doontaa Dhagaysi Dadweyne oo ku saabsan meesha la balaariyay ee RPZ 29 10-ka bisha Luulyo marka ay saacadu tahay 6:00 Fiidnimo goobta Farshaxanka Rainier. Faallooyinka RPZ waxaa laga dhiiban karaa goobta dhagaysiga ama waxaa lagu soo diri karaa iimaylkan ColumbiaCityParking@seattle.gov 21-ka bisha Luulyo.

SOMALI

Seattle Department of Transportation

## Qorshuhu muxuu yahay?

Meelo baabuurta la dhigto oo Lacag ah ayaa lagu bedeli doonaa xadadka wakhtiga lacag la'aanta ah ee hadda jira. Meelaha baabuurta la dhigto ee lacagta ah waxay lahaan doontaa isku jir ka kooban 2- iyo 4- xadad wakhti saacad ah, ay la jirto 2-saacadood oo boos ah oo oggolaanaya 3 saacadood oo baabuur dhigasho ah midaas oo la iibsado wixii ka dambeeya 5 Galabtii.

Xadadka wakhtiga lacag la'aanta ah ayaa lagu dari doonaa waddooyinka kale oo ganacsi ee ku yaala meesha hadda aan lahayn xadad wakhti.

Goobta Baabuurta la dhigto ee Xadeysan ee (RPZ) 29 waxaa lagu qorsheynayaa in loo balaariyo dhinaca bari. Dhammaan dadka deegaanka iyo shaqaalaha ee goobta RPZ ee la balaariyay waxay xaq u yeelan doonaan oggolaansho. Waxaa jiri doona Dhagaysi Dadweyne oo ku saabsan balaarinta goobta RPZ 10-ka Luulyo, 2017 laga bilaabo 6:00 Fiidnimo illaa 7:30 Habbeenkii midaas oo ka dhacaysa meesha Hoolka Farshaxanka Rainier ee ku yaala Waddada Alaska 3515 S. Fadlan si aad u heshid macluumaad dheeri ah oo ku saabsan balaarinta RPZ fiiri bogga internetka mashruuca ama nala soo xiriir.

Meelo cusub oo RPZ 29 ayaa lagu dari doonaa Waddada S Ferdinand

Xadadka baabuur dhigashada waxaa lagu dhejin doonaa waddooyinka bariga waddada 39th Ave S si loo wanaajiyo wareega baabuurka.

Meelo loogu talogalay dadka naafada ah ee leh xad wakhti 4-saacadood ah ayaa lagu dari doonaa Waddada S Edmunds iyo Waddada S Hudson.

Goob kusoo degaan rakaabka galabtii ayaa lagu dari doonaa dhinaca bariga ee Waddada Rainier Ave S. Waxay leedahay goobo jira oo dadku ku degaan dhinaca galbeedka.

## Sabab loo samaynayo isbedeladaan?

Daraasad baabuur dhigasho iyo dhagaysi dad baddan oo qaadatay sannad, waxaynu maqalnay oona aragnay in ay aad u adagtay in laga helo qaybo kamid ah Magaalada Columbia meelo baabuurta la dhigto, waddooyinkaas gaarka ahina waa kuwo ay adagtahay in la maro. Qaybaha qorshahaan waxay u wada shaqaynayaan sidii loo wanaajin lahaa wareega baabuurta oona looga dhigi lahaa baabuur dhigashada mid inbaddan ay heli karaan macaamiisha, dadka booqashada ku yimid, iyo shaqaalaha. Fullinta meelo baabuurta la dhigto oo lacag ah iyo xadad wakhti ayaa wanaajin doonta baabuur dhigashada meelaha ugu cariiriga baddan ee deriska. Balaarinta goobta RPZ waxay ka hor tagi doontaa baabuur dhigashada muddada-dheer ee waddooyinka dadka deegaanka ee deriska ah iyo kuwa aan meesha ka shaqaynin ama meesha ku noolayn. Xadadka baabuur dhigashada waxay wanaajin doontaa wareega dhismooyinka deegaanka dheer ee bariga Rainier. Goobta rakaabka ku dego fiidkii iyo meelaha loogu talogalay dadka naafada qabba waxay sidoo kale wanaajin doonaan gelida deriska.




**ISBEDELADA LA QORSHEEYAY**

- La bixiyay, $1/saacad, 8 Subaxnimo-8 Habbeenimo Asniin-Sabti, xad 2 saacadood ah, Ay la jirto 3 saacadood oo ah kadib 5 Galabnimo (60 boosas)
- La bixiyay, $1/saacad, 8 Subaxnimo-8 Habbeenimo Asniin-Sabti, xad 4 saacadood ah (20 boosas)
- RPZ, 7 Subaxnimo-6 Fiidnimo Asniin-Jimco, 2 saacadood aan ka ahayn haddii oggolaansho la helo (390 boosas)
- Xadad Wakhti Lacag la'aan ah, 7 Subaxnimo-6 Fiidnimo, Asniin-Sabti, xad 2 saacadood ah (40 boosas)
- Calaamada Tusinaysa Gaariga In Aan La dhigan karin
- Samaynta Meelo Gaarigu Ka-wareego
- Dib u meelaynta Goobta Ka degida Rakaabka Maalinta ah ee Hadda jirta iyo in lagu Darro Ka degid Rakaab Kaliya 6 Fiidnimo - 2 Subaxnimo
- In lagu Darro Boosas Baabuur dhigasho RPZ 29 Cusub
- Baabuur Dhigasho Loogu talogalay Dadka Naafada Qabba, Xad 4 saacadood ah

## Goormee isbedeladaan dhacayaan?

Fullinta isbedeladaan waxaa lagu qorsheeyay in ay dhacdo deyrta 2017. Cusboonaysiinta jadwalka waxaa lagu soo qori doonaa bogga internetka mashruuca.

**Macluumaadka Mashruuca, Su'aalaha Soo Noq-noqda Marwalba, iyo Xiriirka**
www.seattle.gov/transportation/parking/cp_ColumbiaCity.htm

Iimayl: ColumbiaCityParking@seattle.gov ama soo wac (206) 733-9026

Dhagaysiga Dadweynaha ee ku saabsan Ballaarinta RPZ: Asniinta 10- Luulyo, 2017 laga bilaabo 6:00 Fiidnimo illaa 7:30 Habbeenimo goobta Hoolka Farshaxanka Rainier ee ku yaala Waddada 3515 S Alaska. Fadlan noola soo xiriir si horumarin ah haddii aad u baahantahay adeego turjubaan kullankan ah.